

# WASHCAP

Mashruuca Codsiga La isku daray ee Gobolka Washington

## **Miyaan ku khasbanahay in aan ka qaato caawimaadaa cuntada tooska WASHCAP?**

Kaaladaha qaarkooda, waxaad dooran kartaa in aad qaadatid (Basic Food) Cuntada Aasaasiga ah bedelki WASHCAP. Fadlan la xiriir WASHCAP haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan joojinta.

## **Maxaad u baahantahay in aad oggaatid ee ku saabsan Wareejinta Dheefaha Eliktarooniga ah (EBT)?**

- Haddii aad hore u haysatay kaarka EBT ee Washington, waad isticmaali kartaa asaga iyo Lambarkaaga Aqoonsiga Shakhsiyeed ee hadda ah (PIN).
- Haddii aadan lahayn kaarka EBT waxaad na waydiisan kartaa in aan kaar kuugu soo dirno boostada. Kaarka waa in uu kuugu yimaado gudaha 5-7 maalmood ganacsi.
- Waxaa lagu soo dari doonaa buug tilmaan-bixineed oo yar kaarkaaga EBT.



## **Ma siin kartaa kaarkaaga EBT qofkale si uu adiga kuugu sameeyo dukaamaysi?**

- Waa in aadan weligaaga siinin kaarkaaga EBT ama Lambarkaaga Aqoonsiga Shakhsiyeed qofkale.
- Si aad ugu oggolaatid dadka kale in ay adiga kuugu sameeyaan dukaamaysi, fadlan wac WASHCAP si aad u codsatid foomka Bedelka u ah oggolaanshaha qofka haysta kaarka.

## **Maxay yihiin xuquuqahaaga iyo mas'uuliyadahaaga?**

- Waxaad xaq u leedahay in aad codsatid dhagaysi maxkamadeed haddii aadan oggolaanin go'aanka aynu ka gaarno caawimaadaada cuntada.
- Adiga waxaa lagaaga baahanyahay in aad usoo sheegtid dhammaan isbedelada ku saabsan xaaladaada dhinaca shaqaalaha Maamulka Dammaanada Bulshada (SSA).
- Sidoo kale adiga waxaad ka wici kartaa WASHCAP lambarkan 1-877-380-5784 si aad u oggaatid haddii isbedeladan ay saamaynayaan caawimaadaada cuntada iyo haddii kale oo aan saamaynaynin.

## **Mashruuca Codsiga La isku daray ee Gobolka Washington**



Transforming lives

DSHS 22-480 SM (Rev. 4/18)

## Mashruuca Codsiga La isku daray ee Gobolka Washington

### Maxay yihiiin dheefaha WASHCAP?

- Waraysigaaga loogu talogalay dheefaha SSI wuxuu noqon karaa waraysigaaga loogu talogalay caawimaada cuntada.
- Kuma weydiin doono inaad buuxisid foomam baddan.
- Waxaad haysan kartaa muddo shahaado siin ah.
- Waxaa dhici karta in aadan weligaaga aadin xafiiska Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS).
- Dheefahaaga cuntada waxaa lagu shubi doonaa koontada wareejinta dheefaha eliktarooniga ah (EBT). Waxaan kuu soo diri doonaa kaar aad isticmaashid marka aad soo iibsanaysid khudaarta. Kaarka koontada wareejinta dheefaha eliktarooniga ah wuxuu u shaqeeyaa sida kaarka bangiga ama kaarka deynta.



### Sideen ku heli karaa caawimaada cuntada WASHCAP?

Waxaad qaadan doontaa WASHCAP marka laguu oggolaado caawimaada cuntada oona adiga:

- Qaadatid SSL;
- Tahay ugu yaraan 18 sanno jir;
- Guursanin;
- Guursatay balse aadan la noolayn xaaskaaga ama ninkaaga;
- Aadan la noolayn carruurtaada ka yar 22 sanno jir;
- Aadan shaqayn; oona
- Nooshahay keligaaga ama soo iibsatiid oona karsatid cuntadaada ayada oo ay jiraan dadkale oo adiga kula nool.

### Sideed usoo sheegtaa isbedelada?

- Ugu soo sheeg isbedelada Xafiiska Dammaanada Bulshada (SSA) lambarkan 1-800-772-1213.

### Maxay yihiiin isbedelada aad u baahantahay in aad usoo sheegtid dhinaca Dammaanada Bulshada?

- Dakhliga
- Ilooyinka dhaqaale
- Xaalka guurka
- Xaaladda Nolosha

### Goormeен muraajaco kusamaynaa kiiskaaga?

- Marka Xafiiska Dammaanada Bulshada uu muraajaco kusameeyo kiiskaaga, caawimaada cuntadaada ee WASHCAP waxaa dhici karta in dib loo xaqijiyo ama shahaado loogu sameeyo inta lagu guda jiro muraajacada uu samaynayo Xafiiska Dammaanada Bulshada.
- Haddii Xafiiska Dammaanada Bulshada uusan muraajaco kusamaynintu kiiskaaga, waxaan kuusoo diri doonaa foom la buuxinayo oona dib loo soo celinayo kahor inta aanan joogsanin dheefahaaga.

### Muxuu yahay mashruuca cuntada ee WASHCAP?

WASHCAP waa Mashruuca Codsiga La isku daray ee Gobolka Washington. Waa barnaamij cunto khaas ah oo la siyo dadka qaar kuwaas oo qaata SSI.

*Fadlan ka wac WASHCAP lambarkan  
1-877-380-5784 haddii aad qabtid  
wax su'aalo ah.*